Natiijooyinka daraasadda oo ay IDMC ka fulisay gobolka Banaadir sannadki 2019 iyadoo loo marayo wareysiyo lala yeeshay barakacayaasha iyo bulshada martida loo yahay

Qayb ka mid ah *Saamaynta Barakaca Gudaha ee Bulshooyinka Deegaanka maxaliga*: Tusaalooyinka ka socda Itoobiya iyo Soomaaliya, Louisa Yasukawa, Sahankii Qaxootiga Saddex biloodlaha, 2020, 39, 544-551

163 barakacayaal ah ayaa daraasad laga sameeyey gobolka Banaadir. Barakacayaasha la soo baaray ayaa noloshooda beero-iyo-xoola-dhaqato uga hayaamay abaartii sanadihii 2017 iyo 2018 darteed waxayna ku noolaayeen deegaanka loo barakacay ee Garasbaaley ee degmada Dayniile. Wareysiyada waxaa sidoo kale lala yeeshay 160 xubnood oo ka tirsan bulshada maxalliga ah ee ku nool aagagag agagaaraha ee Hodan iyo Warta-Nabada.

Guriyeynta

Gobolka Banaadir, Soomaaliya, jawaabayaasha ugu badan ee barokacayaasha ah waxay ku noolaayeen guryo ka sameysan cooshado, halka dadka la wareystay ee bulshada maxalliga ah ay ku noolaayeen guryo abid raago oo ka sameysan dhagax ama bulukeeti.

Qiyaastii boqolkiiba 60 ka mid ah xubnaha la waraystay ee bulshada maxalliga ah ayaa si isku mid ah ugu qancay xaaladaha guryahooda ka dib imaatinka barokacayaasha sidii ay markii hore ahaayeen, halka boqolkiiba 18 ay xitaa aad ugu qanceen. Mid ka mid ah sababaha heerkan qanacsanaanta wanaajiyay waxay noqon kartaa kororka celceliska dakhliga xubnaha bulshada ee la daraaseeyay, taasoo u suurta gelisay jawaab bixiyaasha qaar inay hagaajin ku sameeyaan guryahooda.

Si kastaba ha noqotee, ku dhowaad rubuc ka mid ah xubnaha la waraystay ee bulshada maxalliga ah ayaa sheegay inay in yar ku qanacsan yihiin xaaladaha guryahooda ayadoo ay sababtay kor u kaca qiimaha kirada iyo biilasha adeegyada kale sida biyaha,korontada. Tani waxay ka muuqataa xaqiiqda ah in seddex meelood meel ay soo sheegeen inay bixinayaan kharashaad guri oo dheeraad ah ka dib imaatinka barokacayaasha aagga, celcelis ahaan kharashka dheeriga ah waa $ 24 bishiiba. In kasta oo barakacayaashu ay dhif iyo naadir tahay inay ka bixiyaan kiro guryaha deegaankan ee bulshada ku hareeraysan nawaaxigan, haddana dhowr xubnood oo ka mid ah bulshada maxalliga ah ayaa u aaneeyay kororkan qiimaha ku yimid imaatinka barokacayaasha deegaanka.

Habnololeedka.

Natiijooyinka waxay soo jeedinayaan in barakaca gudaha uu sidoo kale soo bandhigi karo fursado dhaqaale oo cusub isla markaana kobcin karo suuqyada maxalliga ah. Banaadir, imaatinka barokacayaasha deegaanka iyo kuwa kale ee soo noqday, oo ay weheliso hagaajinta xaaladda amniga, waxay ku xirnaayeen dadka iyo kororka dhaqaalaha, gaar ahaan warshadaha dhismaha, Taasoo umuuqatay inay ka faa'iideysanayaan bulshada ku hareeraysan. Tani waxay ka muuqatay kororka saamiga xubnaha la daraaseeyey ee bulshada maxalliga ah ee kasbanaya dakhli ka dib imaatinka barokacayaasha, iyo kororka celceliska dhaqaalahooda bilaha ah ee la soo sheegay inuu yahay $ 71 ragga iyo $ 24 oo haweenka ah.

Bedqabka iyo amniga

Gudaha Soomaaliya, ku dhowaad 61 boqolkiiba waxay soo sheegeen inay dareemeen amni ka dib imaatinka barokacayaasha sidii ay ahaayeen markii hore, halka ku dhowaad 10 boqolkiiba ay sheegeen inay amni dheeri ah dareemeen. Kuwa soo sheegay inay dareemayaan nabadgalyo dheeri ah waxay u muuqdaan inay u nisbeeyeen horumarka laga sameeyey guud ahaan xaalada nabadgelyada ee maaha sababta inay tahay barakacayaasha inay joogeen aagga.

In kasta oo inta badan kiisaska imaatinka barokacayaasha aagga aysan horseedin hoos u dhac xagga dareenka ah ee nabadgelyada laga qabo ee bulshada ku hareeraysan, haddana waxaa jiray xoogaa caddayn ah in joogitaanka barakacayaashu ay qaar ka mid ah dadka maxalliga ah dareensiisay amni darro badan.
In ka badan rubuc oo ka mid ah xubnaha bulshada maxalliga ah ee daraasadda laga sameeyay gudaha Banaadir ayaa soo sheegay inay dareemayaan amni ka yar sidii ay ahaan jireen, taas oo ay la xiriiriyeen kororka tuugeysiga iyo isticmaalka daroogada ee la xiriirta imaatinka barakacayaasha. Qiyaasta haweenka la daraaseeyay ee bulshada maxalliga ah ee Banaadir ee soo sheegay inay dareemeen amni ka yar inti hore ayaa ka yara sarreeyey tirade ragga, 30 boqolkiiba iyo 24 boqolkiiba siday u kala horreeyaan
Qiyaasta dadka soo sheegay inay lacag ku bixiyeen sugida nabadgelyadooda - oo ay kujiraan ilaalada amniga, qufulada, iyo eeyaha waardiyaha - ayaa runtii kordhay kadib imaatinka barakacayaasha, taasoo ka kacday 59 boqolkiiba ilaa 73 boqolkiiba Banaadir gudaheed

Waxbarashada

Boqolkiiba 80 ka mid ah xubnaha daraasada lagu sameeyay ee ka tirsan bulshada ku nool Banaadir ayaa si isku mid ah ugu qancay, halka 14 boqolkiiba ay aad ugu qanacsan yihiin. Heerarka xaadiritaanka iskuulka ee carruurta xubnaha ka ah daraasada ee bulshada maxalliga ah hoos uma dhicin ka dib imaatinka barokacayaasha xitaa wey ku korodhay dadka la wareystay ee Soomaaliya, laga soo bilaabo 72 boqolkiiba ilaa 92 boqolkiiba.
Soomaaliya gudaheeda, qaar ka mid ah hay'adaha samafalka ee ka shaqeeya xerayaha barakacayaasha waxay ku bixiyeen adeegyada waxbarashada aasaasiga ah bilaash, laakiin qoysaska wali waxay ku bixinayeen sahayda dugsiga sida buugaagta. Xubno xog ogaal ah oo ka tirsan bulshada maxalliga ah ayaa soo sheegay inay carruurtooda u direen dugsiyo ka baxsan xerahaya qaarkoodna ay lacag ku bixiyeen inay dhigtaan dugsiyada gaarka loo leeyahay. In kasta oo iskuulada ay dowladu maamusho ay si bilaash ah wax ugu bartaan caruurta oo dhan, hadana mararka qaar aad ayey uga fog yihiin caruurta barakacayaasha ah. In kasta oo heer aad u sarreeya oo qanacsanaanta laga helay bulshooyinka maxalliga ah ee la daraaseeyay, in badan oo ka mid ah kuwa soo sheegay inay in yar ku qanacsan yihiin waxbarashada carruurtooda ayaa xusay in tayada waxbarashada ay saamaysay imaatinka barokacayaasha iyo yaraanta tirada macallimiin.

Caafimaadka

Ku dhowaad saddex-meelood meel xubnaha la waraystay ee bulshada maxalliga ah ee Banaadir ayaa soo sheegay in xaaladooda caafimaad ee jir ahaaneed ay sii xumaatay iyo helitaanka daryeel caafimaad, taas oo ay la xiriiriyeen xarumo caafimaad oo ciriiri ah iyo nadaafad darro. In kasta oo xarumaha caafimaadka ee bilaashka ah ee loogu talagalay dadka soo bara kacay ay u furan yihiin dadka aan soo barokicin sidoo kale, xubnaha bulshada maxalliga ah ayaa inta badan taga goobaha caafimaadka ee gaarka loo leeyahay si ay oga fogaadaan ciriiriga badan, kaasoo la sheegay inay qaadaan lacag ka badan inta ay ku bixin jireen ka hor inta aysan imaan barakacayaasha. Xaqiiqdii,

celceliska kharashka la soo sheegay ee ku baxa la kulanka xirfadle daryeel caafimaad ayaa ka kacay $ 9 kahor imaanshaha barakacayaasha aagga illaa $ 55 kadib.

Gabagabo:

Natiijooyinka waxay soo muujinayaan in saameynta barakaca gudaha ay ku yeesheen bulshooyinka maxalliga ah inta badan ay ka yaraayeen sidii laga filaayay mararka qaarna xitaa way fiicnaayeen. Hase yeeshe xaqiiqda ah in barakacayaasha labada xaaladood ee daraasada lagu sameeyay ay wali la kulmayaan xaalado nololeed oo liita oo ku saabsan degsiimooyinka iyo caqabadaha helitaanka adeegyada ma ahan oo kaliya inay wiiqeyso horumarkooda u gaarka ah ee ku wajahan inay gaaraan xalal waara laakiin waxay sidoo kale saameyn xun ku yeelan karaan bulshada ku hareeraysan. Tani waxay xoojineysaa qiimaha hababka dhammeystiran ee wax looga qabanayo islamarkaana lagu xallinayo barakicinta gudaha, kuwaasoo doonaya in la fahmo oo la isku dheellitiro baahiyaha barakacayaasha iyo dadka maxalliga ah ee aan barokicin si loo yareeyo saameynta xun ee la xiriirta barakaca loogana faa'iideysto fursadaha ay soo bandhigi karto.